

Jamhuuriyada Somaliland
Dawladda Hoose Hargeysa
Xafiiska Duqa Caasimada



Republic of Somaliland
Municipality of Hargeisa
Mayor's Office

Go'aan Lr: 370/2023.

Date: 15th October 2023.

Go'aan Guddi Fulineed.

Shir ay isugu yimaadeen guddida fulinta Caasimada Hargeysa 15th October 2023, Shir Guddoomiyena uu ka yahay Duqa Caasimada Hargaysa Mudane (C/kariim Axmed Mooge), kuna saabsanayd Tirtirid/Cancelid Mulkiyad TR-lambarkeedu yahay 34177, Dood & falan-qayn dheer ka dib.

Guddida Fulintu:-

Markay Arkeen

Sharciga Maamulka Gobolada & Degmooyinka JSL ee Xeer No: 23/2019.

Markay Arkeen

Warqadda Maxkamada ee ay sumadeedu tahay MDH/XG/WB/187/2023, kuna taariikhaysan 2/8/2023, ujeedadeeduna tahay Amar Fulin Warqada Sumadeedu tahay MRGMJ/XG/104/2023, ee 27/7/2023 iyo tirtirid fayl sifo qaldan loo sammaystay.

Markay Oggaadeen

Warbixinta tixraaceedu yahay DH/AGDHDHH/116/2023, kuna taariikhaysan 28/8/2023, ujeedadeeduna warbixin gurri, kana soo baxday Xafiiska Aggaasimaha Waaxda Dhulka Dawladda Hoose ee Hargeysa.

Markay Xaqiiqsadeen

In ay haboon tahay in in la tirtiro mulkiyadan, maadama oo muwaadinkani u sammaystay mulkiyadan sifo qaldan, isla markaana ay lagama maarmaan ay noqotay in la tirtiro maadama aanu lahayn gurriigan.

Markay Tixgeliyeen

Tallada Masuuliyiinta ay hawshani khusayso.

Waxa ay Go'aansadeen :-

Ka dib markey arkeen dhamaan asbaabaha sare ku xusan, Gudida Fulintu waxa ay Go'aansadeen in la Tirtiro/cancel gareeyo Mulkiyadda gurriga TR-Lambarkiisu yahay 34177, kaas oo uu ku qoran yahay muwaadinka magaciisu yahay (Khadar Daahir Cadare), cabirkiisuna dhan yahay 12X12m, kuna yaala Degmada 26-ka June, gaar ahaan xaafada Duriya, mulkiyaddan oo sifo qaldan looga sameeyay gurriga uu leeyahay Xaaji Daahir Cadare Rooble, sida ay caddaysay Maxkamada Degmada Hargeysi.

Allah

Mahad

leh.



(Siciid Nuur Jamaac).

Xoghayaha Fulinta D/Hoose ee Hargeysa.

(Khadar Axmed Cumar 'Khadar Nuur').

Ku-xigeenka Duqa Caasimada Hargaysa.

(C/kariim Axmed Mooge)
Duqa Caasimada Hargeysa, ahna Guddi
Golaha Degaanka Caasimada Hargaysa





Xafiiska Aggasimaha Waaxda Dhuika

Ref/DH/AGDHDHH/_343/2023.

Date: -12/11/2023

Ku: Gudoomiyaha Degmada 26 June

=Hargaysa=

KU: Mamulka Geo Sol

= Hargaysa=

OG: Ku xigeenka duqa caasimada

=Hargeysa=

OG: Xoghayaha dawlada hoose

=Hargeysa=

OG: Duqa Caasimda Jsl

=Hargeysa=

Ujeedo: Wargalin

Aniga oo tixraacaya warqada sumadeedu tahay Go'aan Lr: 370 /2023 kuna tariikhaysan 15/10/23 ujeedadeeduna ahayd tirtirid/Cencell id mulkiyada TR: 34177 kuna qoran yahay muwaadinka magaciisu yahay Khadar Daahir Cadare cabirkeeduna dhan yahay 12x12m kana tirsan degmada 26june.

Tixraac warqada Sumadeedu tahay MDH/XG/WB/187/23 kuna tariikahaysan 02/08/23 ujeedadeduna ahad Amar Fullin Warqada Sumadeedu tahay MRGMJ/XG/104/2023 EE 27/07/23 IYO Tirtirid fayl sifo qaldan loo samaystay kana soo baxday Gudoomiyaha Maxkamada Degmada Hargaysa (Yaxye Xuseen yuusuf).

Hadaba aniga oo ka duulaya arrintan waxan idinku war galinayaa in aan wax file ah laga soo process garayn Karin NR/CO midna.

ALLAAH MAHAD LEH

Maxamed Yuusuf Cismaan
Aggasimha Waaxda Dhulka DHH



Email.MohamedYusuf@dhhgov.org Hargeysa